



West Seattle and Ballard

Link Extensions

Xagaaga 2021

U diyaar garowga Qabyo-qoraalka EIS

Delridge



Waa maxay Qaabyo-qoraal EIS?

Qabyo-qoraal EIS waa dukumenti dib-u-eegista deegaanka oo tilmaamaysa wadooyinka iyo goobaha astaanka ee laga fekerayo –loona yaqaan xulashooyinka (khiyaarada). Waxa ay ka caawinaysaa Sound Transit, hay'adaha aan wax la wadaaga, dadweynaha iyo ciddii kale ee go'aanada wax ku leh in ay fahmaan saamaynta ka iman karta iyo faa'iidooyinka ay keeni karto xulasho walba iyadoo la tilmaamayo raadka ay ku yeelanayso degaanka dabiiciga ah iyo kan dhisanba, nidaamka gaadiidka inta dhismaha lagu guda jiro iyo hawlgelintiisa mustaqbalka. Waxaan fileynaa inaan soo saarno dib u eegis iyo faallooyinka dadweynaha ee Qabyo Qoraalka EIS ee isla kordhinta Ballard iyo Galbeedka Seattle horaantii 2022 shabakada.

Waxaan u baahannahay talooyinkaaga!

Wakhtiga faalada Bayaanka Saamaynta Deegaanka ee Qabyo-qoraalka ah waa dhacdo muhiim oo na siinaysa tallooyin iyo mid caawinaysa qaabka bulshadaadu u arkayso mashruuca. Taladaadu waa qayb muhim ah oo ka mid ah geedi-socodka Qabyo-qoraalka EIS iyadoo ka caawinaysa Golaha Sound Transit in ay fahamto waxa muhimka adiga kuu ah marka ay kala doorayaan qaababka kala bedelan ee dhismaha.

Rukumo (Kusoobiir) emaylada mashruuca si aad ula socoto wakhtiga iyo sida aad uga qayb qaadanayso:

wsblink.participate.online

Wakhtiga iyo sida aad uga faaloon karto

Waxaad awood u yeelan doontaa in aad nala wadaaagto faalooyinkaaga* Qabyo-qoraalka EIS adigoo isticmaalaaya qaabab kala duwan, sida:



Khadka internet ka



Telefoonka



Boostada iyo Emaylka



Shirarka



**Ka faalood diraacdaan
(sanadka soo socda)**

Sound Transit waxay rajaynaysaa in la sii daayo Qabyo qoraalka EIS horaanta 2022, the ka dibna xilliga faallooyinka ayaa soo socda.

Waxa aan ku ogaysiin doonaa bulshada daabacado kala duwan iyo warbaahinta dhijitaalka ah

* Faallooyinka waxaa lagu qori karaa luqaddii la doono. Waa tarjumi doonaa faallooyinka luqadaha ay nagu soo gaaraan qaababkaan hoose.

** Hawlaha qof ahaaneed waxaa ay ku xiran yihiin tilmaamaha goboleed iyo tan Dawladda Federal ee jirta marka la sii deynayo Qabyo-qoraalka.





Faaladu sidee bay u egtahay?

Soo jeedimahaan soo socda baa laga yaabaa in ay kaa caawinaan faalooyinkii aad ku dari lahayd Qabyo-qoraalka ee sanadka dhammaadkiisa.

- ✓ **Muhiimada saar mushkilad khaas ah intii aad hadal caam ah oran lahayd.**
- ✓ **Nala wadaag ra'yigaaga ku saabsan mashruuca kuna soo dar sababta aad sidaaas u dareemaysid.**
- ✓ **Sheeg sababta aad u taageeraysid ama u diidan tahay adigoo soo jeedinaya xalalka suurtagalka ah**

Maxaa dhacaya marka aad ka faalootid?

Iyadoo laga duulayo falanqaytan Qabyo-qoraalka EIS iyo faalooyinka dadweynaha ee na soo gaarey, Golaha Sound Transit waxa ay ku adkaysan doonaan ama bedeli doonaan xulashooyinka (khiyaarada) la door bidayay. Xulashooyinka la doorbidayay iyo bedelada kale ee Qabyo-qoraalka EIS iyo jawaabaha laga bixiyay faalooyinkii ee na soo gaaraay, waxaa lagu dari doonaa EIS ka kama dambaysta ah oo la filayo in la daabaco 2023da. Intaas dabadeed, Golaha Sound Transit waxa uu dooran doonaa mashruuca la dhisayo."


* "Xulashooyinka (khiyaarada) la doorbidayay waxa ay muujinayaan in laga qadarinayo dhanka xulashooyinka kale laakiin ma ahan go'aankii kama dambaysta ahaa ama lagu khasbanaa. Go'aanka kama dambaysta ah oo wadooyinka iyo goobaha astaanka ee la dhisayo waxaa la gaari doonaa marka EIS ka la daabaco."

Link light rail
Ballaarinta isku-xirka West Seattle and Ballard: Delridge goobaha

- Xulashooyinka (khiyaarada) la doorbiday
- Xulashooyinka (khiyaarada) kale ee Qabyo-qoraalka EIS
- Xulashooyinka (khiyaarada) la doorbiday ee maalgelinta daraf-saddexaad"

Astaamaha wadooyinka

- Wadada sare loo qaadey
- Wadada dhulka hoos-marta
- Wadada dusha (oogada) sare
- Goobaha maxadooyinka
- Mustaqbalka RapidRide H Line: Bartamaha magaalada Seattle-Burien



Su'aalo?

La xiriir hawlgalinta bulshaada:
wsblink@soundtransit.org ama 206-903-7229

Rukumo (Kusoobiir) emaylada mashruuca si aad ula socoto wakhtiga iyo sida aad uga qayb qaadanayso:

wsblink.participate.online



Turjumaanka 800-823-9230

Español 漢語 한국어 日本語
 Tagalog русский язык Tiếng Việt



Macluumaadka oo qaabab kala bedelan:
 800-201-4900 / TTY: 711
 Emayl ka: accessibility@soundtransit.org

Nala soco:



Qolka furan ee internet ka

Map for illustration purposes only. Not to scale.